



OREGON
DEPARTMENT OF
EDUCATION

Hab maamuuska baar si aad u Joogto Hannaanka 5-Tallaabo oo loogu talagalay Waalidiinta iyo Qoysaska

1. Dugsiga waxaa uu ku ogaysiinayaa in canugaaga uu xiriir dhow la yeeshay kiis COVID-19 laga helay(togan) oo la yaqaano intii uu dugsiga joogay.
2. Qoyska waxaa uu bixiyay ogolaanshaha loogu talagalay baritaanka COVID-19 waxaa uuna ogolaaday inuu raaco shuruudaha baar si aad u joogto, kuwaas oo ay ka mid yihiin isku karantiilida banaanka dugsiga iyo xirashada maaskaro marka uu kaqaybgalaayo hawlaha manhajka ka baxsan.
3. Canugaaga waxaa lagaga baaray COVID-19 goobta baaritaanka dugsiga.
4. Haddii natiijooyinka baaritaanka COVID-19 ay yihiin:
Togan - canugaaga waa in isla markiiba lagu go'doomiyaa guriga
Laga waayey(taban) - canugaaga waxaa uu sii wadan karaa inuu xaadiro dugsiga ilaa iyo inta uusan lahayn ama aysan kasoo muuqan calaamadaha COVID-19.

5. Ardaygaaga waxaa la baari doonaa laba jeer muddo 7-maalmood gudahooda ah. Baaritaan ayaa lagula talinayaa isla markiiba kadib marka la ogaado inuu xiriir dhow la yeeshay qof qaba fayraska iyo mar labaad 5-7 maalmood kadib u baylah noqoshada fayraska.

Waxaa muhiim ah in la xasuusnaado in **haddii canugaaga la tallaalo oo uu u baylah noqdo COVID-19, ma aha in la karantiilo ama la baaro.** Markii canugaaga aan tallaalneyn uu ugu baylah noqdo guriga fayraska ama inta lagu guda jiro hawlaha manhajka ka baxsan halkaas oo xirashada maaskarada ay ka tahay ikhtiyaari, hab maamuuska baar si aad u joogto ma aha xulasho.